

**Faafin degdeg ah**

**ERGEYGA GAARKA AH EE XOGHAYAHA GUUD U QAABILSAN SOOMAALIYA  
MICHAEL KEATING**

**WARBIXINTA UU GOLAHA AMAANKA KA SIIYAY SOOMAALIYA**

**23 MAARSO 2017, NEW YORK**

Mudane Madaxweyne,

Sida uu sheegay Xoghayaha Guud markuu ku jiray booqashadiisa ugu horeysay tan iyo inta uu xilka la wareegay, Soomaaliya waxay maraysaa marxalad masiiba ah, rajana leh.

Waa masiibo, waayo waxaa hadda dalka hareeyay aafu baniaadanimo oo ka dhalatay abaaraha, oo khatar ah inay macluul keenyo.

Waa rajo, waayo hanaankii doorashada dhowaan la qabtay wuxuu abuuray yididiilo ah in wadashaqayn siyaasadeed oo cusub uu dhexmaro Soomaalida. Golaha wasiirada oo 48 saac ka hor lagu dhawaaqay, oo ay ku jiraan lix wasiir oo haween ah, waa tallaabo kale oo muhim ah oo horey loo qaaday.

Mudane Madaxweyne,

In ka badan lix milyan oo Soomaali ah – oo ah kala bar tirada guud ee dadka – ayaa hadda kaalmo u baahan. Ku dhowaad saddex milyan, oo haween iyo carruur u badan, ayaa u baahan taageero degdeg ah oo noloshooda lagu badbaadiyo, waxaana ka mid ah tiro sii kordheysa oo ah barakacayaal ku nool xaalado baaba' ah.

Dadka Soomaaliyeed, oo ay ka midyihii siyaasiyiinta, ganacsatada, bulshada rayidka iyo xubnaha qurbajoogta, ayaa qaadaya mas'uuliyadda gurmadka abaaraha. Sidaas bay Soomaaliya kaga duwantahay dalalka kale ee ay aafeeyeen masiiboo yinka baniaadanimo.

Madaxweyne Farmaajo ayaa ku dhawaaqay masiibo qaran maalmo gudahooda ka dib markuu la wareegay. Wuxuu gogol kasta oo la helo u adeegsanayaa abaabulka taageerada dalka gudihiisa iyo ta caalamka.

Waxaa weli caqabad ah sidii lagu gaari lahaa meelo badan, oo ay ka midyihii degaannada ay ka taliso kooxda Al Shabaab. Laakiin haddii la barbar dhigo sannadkii 2011, markaaso dad gaaraya 260,000 ay dhinteen, baaxaadda gurmadka lala gaarayo dhibaatada way ka ballaaratuhay maanta.

Waxaa ballaartay goobaha ay gaarayaan adeegyada taleefoonada gacanta iyo siyaabaha kala duwan ee lacagta la isugu xawilo; waxaa sare u kacday xogta la xiriirta baahida iyo qiimeynta la sameeyay; waxaa xoogeystay gacan ku haynta dhaqaalahay iyo hubsashada hay'adaha lala shaqeeyo; waxaana korortay tayada hawlgalka.

Hay'adaha gargaarka baniaadanimo ayaa sare u qaadaya gurmadka waxaana ka mid ah iyagoo la kaashanaya ganacsatada gaarka ah iyo barnamijyada lacag bixinta ee laga hirgeliyo degaannada ay

abaartu saameysay. Dad badan baa hadda lala gaarayaa adeegyada gargaar cunto, taageero nafaqo, daryeel caafimaad iyo biyo nadiif ah oo la helo.

Laakiin wax intaa ka badan baa loo baahanyahay.

Caqabadaha ugu degdeggaa badan waxaa ka mid ah in dhaqaale loo helo hawsha degdeggga ah ee badbaadinta nolosha, gaar ahaan gurmadka cudurka shubanka/daacuunka, ee hadda saameeyay 11 ka mid ah 18ka gobol. Waxaa dalka oo dhan laga furaya xarumo iyo waaxyo lagu daweyyo, laakiin cudurku weli wuu sii faafayaa. Waxaa degdeg loogu baahanyahay in si dhakhsa ah sare loogu qaado tallaabooyinka daaweynta iyo ka hortagga roobabka ka hor, oo dhibaatada sii kordhin kara.

Qorshaha Hawlgalka Ka Hortagga Macluusha wuxuu doonayaa in la helo \$825 milyan si loo gaaro dad gaaraya 5.5 milyan ilaa bisha June. Dhaqaalaha hadda qorshuha soo gaaray waa boqolkiiba 32. Caqabadaha dhaqaale bixinta iyo lacag diridda ayaa horjoogsaday inay kordhaan hawlaha gurmadka billowgii sannadka.

Waxaa loo baahanyahay in dhaqaale badan la helo ilaa dabayaaqada bisha Maarso si hay'adaha hawlgala ay ugu suurtowdo inay gaaraan dadka tabaaleysan intay goori goor tahay.

Waxaan soo dhoweynayaa dhaqaalaha ay dhowaan sida deeqsimimada leh ay ugu deeqeen dalal badan iyagoo ka jawaabaya baaqii kaalmada ay jeediyeen Dowladda Soomaaliya iyo Qaramada Midoobay, oo ay ka midtahay dhaqaalaha ay dowladdaadu ku deeqday, Mudane Madaxweyne.

Haddii hanaanka doorashada aysan ka dhalan lahayn natijjo la wada aqbalay inay xalaal tahay, dadaallada gurmadka abaaraha aad bay u adkaan lahaayeen.

Dhab ahaantii, hanaanka doorashadu wuxuu abuuray rajo ballaaran.

Baarlamaanka cusub waxaa ku jira dad aad u kala duwan, dhallinyaro iyo haween ka badan kuwii ku jiray baarlamaankii hore. Doorashu waxay ahayd mid inta badan ku dhacday si nabad ah, Al-Shabaabna u muustoobin inay weeciyaa. AMISOM iyo ciidamada amniga iyo nabadsugidda Soomaaliyed ayaa shaqo fiican ka qabtay ilaalinta goobaha doorashada.

Doorashada madaxweynaha waxay u dhacday si daahfuran. Madaxweynihii hore, Xasan Sheekh Maxamuud, wuxuu mudanyahay in lagu amaano sida habsamida ah oo nabadda ah ee uu xilka u wareejiyay.

Farxadda iyo u riyaaqidda lagu soo dhoweeyay Madaxweyne Farmaajo 8dii bishii Febraayo kuma koobnayn oo wey dhaaftay xudduudaha beelaha iyo gobollada.

Natijjada hanaanka doorashada waxay dhalisay rajo iyo raynrayn aad u ballaaran. Sida uu yiri Ra'iisal Wasaaraha Itoobiya Hailemariam, "Dadka Soomaaliyed taariikh bay dhigeen waxayna tusaale weyn u noqdeen dalalka ka soo kabanaya colaadda"

Dhibaatooyinka iyo dhalliilaha hanaanka doorashada waxba uma dhimin rajada laga qabay in Doorasho Qof iyo Codkiisa ah ay dhacdo sannadka 2020.

Diyaargarowgu waa inuu hadda billowdaa si loo sameeyo hanaanka shari iyo midka maamul ee lagama maarmaanka ah, si loogu gogol xaaro doorasho loo wada dhanyahay looguna ogolaado in haweenku ay si siman ula tartamaan raga. Si taas ay u dhacdo, QM waxay toddobaadkan diraysaa Ergo Hawlgal oo Baahida Soo Qiimeeya.

Xukuumadda iyo baarlamaanka cusub waxay hadda haystaan fursad ay ku adeegsadaan rajada jirta si ay mar kale u billaabaan dadaallada lagu dhisayo dowlad shaqeysa oo loo wada dhanyahay – si wax looga qabto arrimaha dhaqan-dhaqaale, nidaam iyo siyaasadeed ee ka dhigaya malaayiin Soomaali ah oo isugu jira haween, rag iyo carruur kuwo aad u nugul.

Si loo helo dowlad shaqeysa oo leh gobanimo dhab ah, Soomaaliya waa in heshaa hab ay kaga maaranto inay ku tiirsanaato dhaqaale shisheeye oo ay ku tashato dhaqaalaheeda.

Haddii aysan Soomaaliya billaabin inay soo jiidato maalgashi dhab ah oo aysan soo saarin dakhli gudaha ah, dowlad-dhisiddu waxay ahaan doontaa yididiilo keliya, dalkuna wuxuu sii ahaan doonaa mid si khatar ah cid kale ugu tiirsan oo u nugul dhibaatooyinka cimilada la xiriirta.

Tani waxay u baahnaan doontaa hay'ado tayo dheeraad ah leh iyo weliba xiriir iyo wadashaqeyn dhexmarta dowladda iyo ganacsata gaarka ah.

Dowladdu waa inay ururisaa canshuuraha iyadoo dhanka kalena dadka u xaqijinaysa in lagula xisaabtami doono dhaqaalaha ay ururisay, loona adeegsan doono in lagu bixiyo adeegyada asaasiga ah, oo ay ka midyihii amniga iyo ku dhaqanka sharciga.

Madaxweynaha iyo Ra'iisal Wasaaraha ayaa laftooda ballanqaaday in sare loo qaado maareynta maaliyadda guud, hufnaanta iyo isla xisaabtanka, oo ay ka midyihii tallaabooyin adag oo lagula dagaallamo musuqmaasuqa, oo ay u arkaan inuu ka dambeeyo nabadgeleyo darrada.

Tallaabooyinkan ma noqon doonaan kuwo fudud. Waxay mudanyihii taageeradeena, oo ay ka midtahay dhiirigelin la siiyo ganacsiga gaarka loo leeyahay. Waxaa loo baahanyahay in taageero lagu bixiyo in la tirtiro deemaha Soomaaliya lagu leeyahay taasoo u ogolaanaysa inay qaaddo waddada deyn cafinta.

Mudane Madaxweyne, caqabad intaa ka degdeg badan ayaa ah ciribtirka aafada argagaxisada. Dhibaatada ka dhalata aad bay u badantahay, xagga nolosha baniaadanka iyo fursado ka luma Soomaaliya, iyo weliba dalalka deriska la ah Soomaaliya iyo beesha caalamka, oo ay ka midyihii dalalka xubnaha ka ah Golahan.

Guul laga gaaro in la kala dhantaalo hoosna loo dhigo awoodda Al Shabaab waxay u baahantahay in siyaabo kala duwan loo abaayo, taasoo ku jirta istaraatijiyyad siyaasadeed ee ay horseedda dowladda Soomaaliyeed.

Tani waxay u baahantahay in taageero la siiyo hawlalka AMISOM, wax ka bedelka hay'adaha amniga Soomaaliya, xallinta colaadaha deegaanka, xasilinta iyo in awoodda dowladda lagu baahiyo degaanada la xoreeyay, iyo wax ka qabashada dhallilaha ka jira maamulka iyo ku dhaqanka sharciga ee Al Shabaab siinaya fursadda ay ku neefsato.

Soomaalidu waxay doonayaan inay qaadaan mas'uuliyad weyn ee ay ku hantaan amnigooda. Weli wax badan dhiman. Ciidamada amniga Soomaaliyeed ma haystaan dhaqaale ku filan, si joogta ah uma helaan mushaaraad, way ka daadsanyihii, inta badan gaar baa loo leeyahay, guud ahaana lala ma xisaabtamo.

Laakiin waxaa lagama maarmaan ah in la dhiso ciidamo amni oo lagu kalsoonyahay oo ay wada aqbalaan dhammaan dadka Soomaaliyeed. Taasi waxay ka dhigantahay fursad weyn oo lagu dhiso laguna

xoojiyo dowladda federaalka – waxaana loo baahanyahay in sidaa loo abbaaro, ee ma ah hawl ciidan oo keliya.

Tallaabada koowaad ee asaasiga ah waa heshiis siyaasadeed ee dhexmara Dowladda Federaalka iyo Dowlad Goboleedyada Federaalka ah, ayna taageeraan baarlamaanka, Dowladda, iyo bulshada rayidka, oo laga gaaro qaabdhismeed amni oo la wadaago, oo wada koobaya ciidanka militeriga iyo booliskaba..

Mudane Madaxweyne,

Heshiiskaas oo kale wuxuu asaas u noqon karaa taageero caalami ah oo aad isugu xiran oo Soomaaliya loo fidiyo, iyo asaaska qorshe wadajir ah oo Midowga Afrika lagala yeesho mustaqbalka AMISOM iyo sida ugu dambeyntii hoos loogu dhimo.

AMISOM waxay udub dhexaad u tahay hab dhammeystiran oo amni lagu gaaro. Laakiin AMISOM waxay gaartay sannad guuradii tobtaad, oo weligeed ma joogi doonto. Dalalka Ciidamada Ku Deeqa waxay leeyihiin qorshahooda iyo danahooda u gaarka ah, deeqbixiyeyaashana waxay wajahayaan baahiyo badan oo caalamka ka jira oo iska horimanaya.

Hase yeeshee, sida muuqatay xilligii lagu jiray hanaankii doorashada, AMISOM weli waxay lafdhabar u tahay amniga Soomaaliya. Joogitaankeedu wuxuu muhim u yahay dhisidda Ciidamada Amniga Soomaaliyeed. Hoos u dhimid degdeg ah oo lagu sameeyo AMISOM waxay noqon kartaa masiibo.

Sababtan awgeed, waxaan Golaha ugu baaqayaa inuu diiradda saaro in la helo dhaqaale lagu hayo joogitaanka AMISOM oo suurtageliya bixitaan ku saleysan duruufta jirta. Ujeeddadu waa inay noqtoaa amni gaarsiisan heer ku filan oo la helo sannadaha soo socda oo ay ka midtahay inta loo diyaargaroobayo doorashooyinka sannadka 2020.

Bisha soo socota ayaa Midowga Afrika iyo Qaramada Midoobay dib-u-eegid wadajir ah ku sameyn doona mustaqbalka AMISOM. Dib-u-eegiddan, iyo natijada Socdaalka Qiimeyn Istarsaatijiga, waa inay Golaha gacan ka siiyaan si uu go'aan uga gaaro tallaabada xigta ee AMISOM, oo ay ka midtahay isticmaalka dhaqaalaha ay dowladaha xubnaha ahi bixiyaan.

Natijada dib-u-eegidda lama filayo inay diyaar noqoto 15ka bisha Abril, dib u dhaca ku yimid dhisidda xukuumadda cusub awgeed.

Mudane Madaxweyne,

Amnigu ma aha arrinta keliya ee mudnaanta leh. In la horumariyo hanaanka dastuurka ayaa welli si degdeg ah loogu baahanyahay. Tallaaboooyinka horumarinta dastuurku waxay u baahnaan doonaan heshiis wadar ogolaasho ah, wadahadal iyo wadatashi oo laga yeesho heerar kala duwan si wax looga qabto dhammaan arrimaha la xiriira federaalka.

Arrin kale waa xoojinta tayada xallinta khilaafaadka. Waxaa lagama maarmaan ah in dhammaan qaybaha bulshada – oo ay ka midyihii haweenka, dhallinyarada, dadka laga tirada badanyahay iyo ganacsatada – laga qaybgeliyo nabad ku xallinta colaadaha.

QM waxay arrintan kala shaqeyn doontaa saaxiibada muhimka ah ee beesha caalamka, sida Midowga Afrika, Midowga Yurub iyo IGAD..

Mudane Madaxweyne,

Waxaa loo baahanyahay in shaqo weyn la qabto si loo hagaajiyo xaaladda liidata ee xuquuqul insaanka Soomaaliya. Waxaan si gaar ah uga walaacsanahay weerarrada loo geysto wariyeyaasha iyo xadgudubyada galmaada ee kordhaya ee lagula kaco haweenka gudaha ku soo barakacay iyo xubnaha beelaha laga tirada badanyahay.

Hawl gallada ciidan iyo xaaladda baniaadanimo ee sii xumaanaysa ayaa dadka Soomaaliyeed ka dhigi doona kuwo u dayacan in lagula kaco xadgudubyada xuquuqul insaanka iyo sharciga caalamiga ah ee xilliyada dagaallada. Waa in mudnaanta la siyyaa in sare loo qaado tayada lagu biyo ilaalinta.

Waxaa lagama maarmaan ah in si buuxda loo hirgeliyo Siyaasadda Dadaalka Feejignaanta Xuquuqul Insaanka, oo ay ka midtahay hirgelinta tallaabooyinka saameynta yareeya.

Gunaanadkii, Mudane Madaxweyne, Soomaaliya waxay wajahaysaa dhibaatooyin badan oo adadag ka dib karkii ay soo martay tobaneeyo sanno oo colaad iyo dagaallo ah, laakiin waxay hadda haysataa fursad siyaasadeed.

Golahan si wanaagsan buu isugu afgaranayaa arrinta Soomaaliya. Wuxaan rajeynayaa in taasi loo adeegsado in wax laga qabto dhibaatada hadda taagan ee haysata malaayiin dad ah laakiin sidoo kale lagu taageero hoganka cusub ee Soomaaliya, Madaxweynaha cusub, iyo Ra'iisal Wasaaraha cusub, si ay wax uga qabtaan arrimaha sababta u ah taasoo ka hortago doonta in masiiba tan oo kale ah ay mar kale dhacdo.

Mahadsanid, Mudane Madaxweyne.